Codsiga ku aadan Maamulka Kheyraadka &
Adeegyada Caafimaadka ee Mareykanka



# Maternal & Child Health Block Grant

**Guudmarka Kooban**
**Codsiga 2023 & Warbixinta 2021**

LUULYO 2022

Washington State Department of Health

Si aad u codsato dukumeentigan oo qaab kale ah, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhegoolaha ah ama maqalka ku adag, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir civil.rights@doh.wa.gov.

**Lambarka Daabacaadda**

DOH 141-062 July 2022 - Somali

Wixii macluumaad dheeraad ah ama nuqullada dheeraadka ah ee warbixintan:

Division of Prevention and Community Health (Waaxda ka hortagga iyo caafimaadka bulshada)

Office of Family and Community Health Improvement (Xafiiska Horumarinta Caafimaadka Qoyska iyo Bulshada)

PO Box 47855

Olympia, Washington 98004-7855

360-236-4501

800-525-0127 (fakis)

MCHBPublicComment@doh.wa.gov

Umair Shah, MD, MPH
Xoghayaha Caafimaadka

# Guudmarka Kooban

**Guudmarka Barnaamijka**
Department of Health (Waaxda caafimaadka) waxay la shaqaysaa kuwa kale si ay u ilaaliso oo ay u wanaajiso caafimaadka dhammaan dadka ku nool gobolka Washington. Kani waa bayaanka hadafkeena. Hadafkeena waa in dhamaan dadka oo dhan ay helaan sinnaan iyo caafimaadka ugu wanaagsan. Barnaamijyadayada iyo adeegyadayadu waxay gacan ka geystaan ka hortagga cudurrada iyo dhaawaca, waxay wanaajiyaan goobaha caafimaadka si ay u noqdaan meelo lagu noolaado lagana shaqeyn karo, waxay bixiyaan macluumaad si gacan looga geysto dadka inay gaaraan go'aano caafimaad qaba, iyo xaqiijinta in gobolkeenu uu u diyaarsan yahay xaaladaha degdegga ah. Waxaan la shaqaynaa hawlgalayaal badan maalin kasta si aan u qabanno shaqadan. Waxaan sidoo kale ka shaqeyneynaa in aan xuddun u noqono hoggaanka bulshada oo aan helno codadka dhammaan dadaalladayada.

Barnaamijka Maternal and Child Health (MCH, Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka) ee Title V ee gobolka waa qayb ka mid ah Office of Family and Community Health Improvement (Xafiiska Horumarinta Caafimaadka Qoyska iyo Bulshada) ee Prevention and Community Health (Waaxda Kahortagga iyo Caafimaadka Bulshada) ee Department of Health (DOH).

Maternal and Child Health Block Grant (MCHBG, Deeqda Loogu Talagalay Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka) waxa ay gobolka siisaa taageero maaliyadeed iyo mid farsamo oo lagama maarmaan ah. Waxay caawisaa barnaamijyada kobciya badqabka waalidiinta, dhallaanka, carruurta, iyo dhallinyarada, oo ay ku jiraan children and youth with special health care needs (CYSHCN, carruurta iyo dhallinyarada leh baahiyaha daryeelka caafimaadka gaarka ah), iyo qoysaskooda. MCHBG waxay sidoo kale kulmisaa awoodaha caafimaadka dadweynaha ee gobolka iyo deegaanka si ay u bixiyaan adeegyada caafimaadka dadweynaha ee aasaasiga ah, kuwaas oo ah awoodaha iyo barnaamijyada *lagama maarmaanka u ah bulshooyinka ku sugan meel kasta si nidaamka caafimaadku uu uga shaqeeyo meel kasta.* Maadaama barnaamijka deeqda uu diiradda saarayo inuu kaalmada siiyo dadka dakhligoodu yar yahay ama ay xaddidan tahay helitaankooda adeegyada caafimaadka, wuxuu gacan ka geystaa shaqada gobolka si wax looga qabto arrimaha sinnaanta ee xagga caafimaadka.

Shaqadeena Title V waxa ay diiradda saartaa arrimaha la xiriira sinnaanta, wax ka qabashada baahiyaha dadka aan helin dhamaan adeegyada loo baahan yahay, iyo meeshii ay jirto baahi muuqata. Tani waxay sababtay inaan shaqadeena diirada ku saarno kordhinta sinaanta xagga caafimaadka anagoo taageerayna xalalka ay bulshadu hogaanka ka tahay iyo habaynta nidaamyada hagaajinta ee ku salaysan kala duwanaanshaha. Waxaan ka shaqeyneynaa sidii aan u wanaajin lahayn natiijada dhalashada ee dadka Madow ama Afrikaanka Ameerikaanka ah iyo Hindida Mareykanka ah / Dhaladka Alaska. Waxaan sidoo kale raadinaynaa inaan ogaano daldaloolada jira halkaas oo baahida adeegyada loo qabo ay ka badan tahay sahayda, sida adeegyada dhalmada iyo hiddaha ee ka jira dhulka miyiga ah, waxaanan heshiisyo la galnaa adeeg-bixiyayaasha halkaas jooga si markaa si wanaagsan loogu adeego goobahaas.

Dhammaan shaqadayada MCHBG waxay la xiriiraan ahmiyadaha gobolka. Washington waxay samaysay qiimaynta baahiyaha intii u dhaxaysay deyrta 2018 iyo gu'ga 2020 si loo ogaado baahiyaha mudnaanta leh ee adeegyada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka iyo si wax loogu kordhiyo ujeedooyinka iyo xeeladaha shaqada MCHBG ilaa muddo shan sano ah.

Waxaan aqoonsanay **afar mabaadi'i oo asaasi ah** inay yihiin aasaaska shaqadayada:
- Dhammaan dadku waxay mudan yihiin fursad ay ku koraan oo ay ku gaaraan heerkooda ugu sarreeya ee caafimaad iyo badqab. Wanaajinta nidaamyada u adeega qoysaska iyo carruurta si ay u noqdaan kuwa la simman dadka kale waa mas'uuliyadda aasaasiga ah ee saaran dhakhaatiirta caafimaadka dadweynaha. Waxaan si farxad leh mas'uuliyaddan ugu lifaaqaynaa shaqadayada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka. Waxaa naga go'an inaan ka hortagno in cunsuriyad lagu lifaaqo barnaamijyadayada iyo siyaasadaha.

- Waxaan qiimaynaa dhaqamada ballan-qaadka ah ee ay bulshadu horumarisay isla markaana ku salaysan caddayn. Dhaqannadani waxay xaqiijinayaan in nidaamyadayada caafimaadka ay u adeegaan qof walba, gaar ahaan dadka ku dhex takooraan bulshada caadiga ah. Waxaan u shaqeynaa qaab soo dhaweynaya is-hoosaysiinta iyo habboonaanta dhaqanka.
- Waxaan ka shaqeyneynaa inaan xaqiijino in hababka ku lifaaqan daaweynta dhaawacyada ay yihiin kuwo ku dhex lifaaqan dhammaan barnaamijyadayada iyo adeegyadayada.
- Waa inaan sii wadnaa qiimeynta saameynta COVID-19 uu ku yeeshay dhammaan barnaamijyada oo aan u samaynaa wax ka bedel hadba sidii loogu baahdo. Waa inaan sidaas sameynaa anagoo si gaar ah diiradda u saarayna qiyamkayaga iyo yoolalkayada la xiriira sinnaanta jinsiyadda iyo qowmiyadaha.

**Baahiyaha muhimka ah ee ahmiyada leh** ee aanu ku aqoonsanay qiimaynta oo aanu diirada ku saarnay shaqadeena waa:
- Kordhinta awoodda shaqaalaha caafimaadka dadweynaha ee deegaanka si ay si xeeladaysan ugu aqoonsadaan, u qorsheeyaan, isla markaana wax uga qabtaan baahiyaha haweenka iyo carruurta ee gobolka oo dhan.
- Kobcinta iyo ilaalinta nidaamyada caafimaadka si loo kordhiyo helitaanka daryeelka ka hortagga cudurada, baaritaanka hore, gudbinta, iyo daaweynta si loo hagaajiyo caafimaadka dadka inta ay nool yihiin.
- Aqoonsashada iyo yareynta caqabadaha hortaagan daryeelka caafimaadka ee tayada leh.
- Horumarinta badbaadada, caafimaadka, iyo taageerada bulshooyinka.
- Kor u qaadida badqabja maskaxda iyo adkeysiga iyada oo la marayo kordhinta helitaanka adeegyada caafimaadka dabeecadda iyo adeegyada kale ee taageerada.
- Kor u qaadida caafimaadka iyo badqabka gabdhaha qaan-gaarka ah iyo haweenka waaweyn, iyadoo la isticmaalayo habab dhammaystiran oo awood u siinaya isu-doodidda iyo ka-qaybgalka nidaamyada caafimaadka.
- Wanaajinta natiijooyinka caafimaadka uurka iyo dhallaanka iyo yareynta sinnaan-la'aanta taasoo sababta cudurrada iyo dhimashada dhallaanka.
- Kor u qaadida caafimaadka iyo badqabka carruurta iyo dhallinyarada, iyadoo la isticmaalayo habab dhammaystiran.
- Aqoonsashada iyo yareynta caqabadaha adeegyada iyo taageerada ay u baahan yihiin carruurta iyo dhallinyarada qaba baahiyaha daryeelka caafimaadka gaarka ah iyo qoysaskooda.
- Aqoonsashada iyo ka jawaab celinta baahiyaha mudnaanta leh ee soo ifbaxaya ee la xiriira xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha iyo saamaynta ay ku leeyihiin hooyada iyo dhallaanka.

Baahiyahan mudnaanta leh ee dawlad-goboleedku waxay hagayeen xulashooyinka diirada lagu saarayay tallaabooyinka waxqabadka qaran ee deeqda, kuwaas oo ah:
- Dhakhtar-booqashada Badqabka Haweenka
- Naasnuujinta
- Baaritaanka korriinka
- Dhakhtar-booqashada dhalinyarada
- Caafimaadka guriga
- Caymis ku filan

Waxaan sidoo kale la soconaa horumarka laga gaaray tallaabooyinka waxqabadka gobolka ee soo socda:
- Yareynta boqolkiiba dadka uurka leh ee isticmaala walxaha sharci darrada ah inta ay uurka leeyihiin
- Kordhinta boqolkiiba shakhsiyaadka uurka leh ee ay daryeelayaashoodu ka hubiyeen niyad-jabka xilliga uurka
- Kordhinta tirada dhallaanka sameeya ugu yaraan hal gelitaan oo nidaamka baaritaanka korriinka caalamiga ah ee gobolka Washington
- Kordhinta boqolkiiba carruurta helaya daryeelka caafimaadka dhimirka marka ay u baahdaan

- Kordhinta boqolkiiba ardayda fasalka 6[aad] ee sheegta inay leeyihiin qof weyn oo ay la hadlaan marka ay dareemaan murugo ama rajo la'aan
- Kordhinta boqolkiiba carruurta bilaabaya dugsiga xannaanada ee muujinaya sifooyinka bulsho iyo shucuureed ee carruurta da'dooda ah
- Yareynta boqolkiiba ardayda fasalka 10[aad] ee sheegta inay isticmaaleen aalkolo 30-kii maalmood ee la soo dhaafay
- Kordhinta boqolkiiba ardayda fasalka 10[aad] ee soo sheega inay haystaan qof weyn oo ay la hadlaan marka ay dareemaan murugo ama rajo la'aan
- Kordhinta boqolkiiba dadka qaan-gaarka ah ee sheegta inay leeyihiin ugu yaraan hal lataliye oo qof weyn ah
- Yareynta boqolkiiba ardayda fasalka 10[aad] ee baahiyaha gaarka ah qaba kuwaas oo sheega inay ku soo dhacaan fikraddaha isdilka
- Yareynta boqolkiiba dadka qaangaarka ah ee aan helin daryeelka caafimaadka sababo la xiriira kharash
- Bilaabitaanka qiimaynta baahiyaha caafimaadka hooyada iyo dhallaanka ee shanta sano ee soo socota taas oo ah qorsheynta joogto ah oo bilaabanaysa mar kale sanadkan
- Taageerida dadaallada ololaha tallaalka COVID-19

Halkaan waxaa ku qoran dhawr tusaalooyin oo muujinaya sida aan u isticmaalno maalgelinta MCHBG iyo sida barnaamijkani u saameeyo bulshooyinka:

- Waxaan inta badan maalgelinta MCHBG u gudbinaa ilaa 35 hay'adood oo caafimaadka deegaanka (LHJs) ka shaqeeya iyo 1 degmo isbitaal oo maxalli ah. Waxaan sidaas u sameynaa si aan u wanaajino nidaamyada caafimaadka dadweynaha oo aan adeegyada MCH ugu bixino gobolka oo dhan. Mid ka mid ah shuruudaha deeqda waa in ugu yaraan boqolkiiba 30 ee maalgelinta loo isticmaalo ka hortagga, daryeelka aasaasiga ah, iyo adeegyada taageerada qoyska ee CYSHCN. Sababtan awgeed, waxaan ka codsanaynaa LHJ kasta inay shaqadan ku daraan qorshe hawleedkooda sanadlaha ah. LHJ-yadu waxay lacagta u soo hartay u isticmaali karaan liiska xulashooyinka taageeraya mudnaanta gobolka ee ku jira codsigayaga deeqda, iyo adeegyada aasaasiga ah ee hooyada iyo dhallaanka.

- DOH waxay ilaalisaa xiriirka iyo taageerada barnaamijyada MCH-yada ee LHJ-yada siyaabo kala duwan, oo ay ku jiraan laba la-taliye oo shaqaale ah kuwaas oo mudnaantooda koowaad ay tahay isku-duwidda LHJ-yada. Waxay bixiyaan xiriiryo lala yeesho khabiiro ku takhasusay arrimaha DOH iyo iimaylo labadii toddobaadba mar ah oo wata macluumaad iyo agabyo la xiriira shaqada MCH. Waxay sidoo kale martigeliyaan shirarka onlaynka ah iyo shirarka caadiga ah ee looga hadlayo mawduucyada MCH-ka, iyo shuruudaha warbixinta. La-taliyayaashan bulsho waxay fahmaan adeegyada MCH iyo daldaloolada ka jira gobolka oo dhan, taas oo gacan ka geysata fahamkeena ku aadan baahiyaha maxalliga ah.

- LHJ-yada waa inay beddelaan sida ay ugu adeegaan CYSHCN sababtoo ah wadarta maalgelinta barnaamijyada caafimaadka dadweynaha ma aysan la jaanqaadin kharashyada sii kordhaya ee ganacsiga. Waagii hore, badi LHJ-yadu waxay shaqadooda CYSHCN xuddun u ahayd maaraynta kiisaska caafimaadka. In yar ayaa bixin kara mushahar tartan ah si ay u shaqaaleysiiyaan ama u beddelaan xirfadlayaasha kalkaalinta. Si loo ilaaliyo barnaamijyada iyo adeegyada waara waxay u baahan yihiin inay sameeyaan iskaashi ay la yeeshaan dugsiyada, ururada bulshada, ururada caqiidada ku salaysan iyo kuwa kale. Faa'iidada kala guurkan uu baaxad ahaan leeyahay ayaa ah in LHJ-yo badan ay xiiseynayaan inay maalgashadaan siyaasadaha iyo xalalka nidaamyada si ay u daboolaan baahiyaha CYSHCN. DOH waxay la hadli doontaa LHJ-yada sanadka soo socda si ay u eegaan qaabka iyo shuruudaha qaybinta maalgelinta MCHBG. Waxaan dib u eegi doonaa shuruudayada hadda ee ah in dhammaan LHJ-yada ay qabtaan xoogaa shaqo ah si ay ugu adeegaan CYSHCN oo ayna u aqoonsadaan siyaabaha looga faa'iidaysan karo hufnaanta iyo in si ka wanaagsan loo daboolo

baahiyaha gobolka oo dhan. Waxaan qorshaynnay waxqabadkan 2020-kii laakiin dib u dhac ayaa nagu yimid sababo la xiriira ahmiyadaha kale ee xaaladaha degdega ah ee COVID-19.

- DOH waxay caawimo farsamo siisaa adeeg-bixiyeyaasha iyada oo u maraysa shirarka iyo tababaro kale Shabakada Isgaadhsiinta ee CYSHCN. MCHBG waxa ay qandaraas kula jirtaa Center for Human Development and Disability (Xarunta Horumarinta Aadanaha iyo Naafonimada) ee University of Washington iyo Medical Homes Partnership Project and Nutrition Network (Mashruuca Iskaashiga Guryaha Caafimaadka iyo Shabakadda Nafaqada). MCHBG waxa ay bixisaa taageerada ka-qaybgalka iyo hogaaminta qoyska iyada oo loo sii marayo Washington State Leadership Initiative (WSLI, Hindisaha Hogaaminta Gobolka Washington) iyo qandaraasyo la gasho ururada qoyska iyo ururada u adeega qoyska. MCHBG waxay la shaqaysaa hay'adaha kale ee gobolka iyo adeeg-bixiyeyaasha si kor loogu qaado nidaamyada gobolka oo dhan si loo horumariyo nidaamka daryeelka iyo iskudubaridka CYSHCN. Tani waxaa ka mid ah ka faa'iidaysiga maalgelinta gobolka si loo taageero shabakadda xarumaha horumarinta neerfaha iyo guddiyada dib u eegista maxillofacial. MCHBG waxay sidoo kale taageertaa waxbarashada iyo wacyi galinta ku saabsan adeegyada Medicaid ee CYSHCN iyada oo u maraysa heshiis lala galayo wakaaladayada Medicaid ee gobolka, HCA.
- Washington waxay ka shaqeysaa sidii looga hortagi lahaa dhimashada hooyada iyadoo la isticmaalayo isku darka maalgelinta gobolka iyo federaalka. Gobolku waxa uu isugu yeerayaa Maternal Mortality Review Panel (Guddi Dib-u-eegis Dhimashada Hooyada) ee Gobolka si ay u eegaan dhammaan kiisaska dhimashada hooyada. Guddigan ayaa go'aamiya arrimaha wax ku biirinaya waxayna soo saarayaan talooyinka looga hortagayo dhimashada. Natiijooyinkoodu waxay muujinayaan dhowr sinnaan la'aan oo xagga jinsiyada iyo dhaqan-dhaqaalaha ah oo gacan ka geystay dhimashadan. Waxaan macluumaadkan u isticmaaleynaa inaan saameyn ugu yeelano shaqadeena mustaqbalka iyo ahmiyadaheena.
- Qaybtayada caafimaadka dhalmada waxay la shaqaynaysaa hawlgalayaasheeda badan si ay wax uga qabtaan arrimaha la xiriira isticmaalka opioid, gaar ahaan sida ay u saamayso shakhsiyaadka uurka leh iyo ilmaha hadda dhashay. Shaqadayada gobolka ee ku aadan Washington State Opioid and Overdose Response Plan (Qorshaha ka jawaab celinta Isticmaalka iyo Si Xad-dhaaf ah u Isticmaalka Opioid ee Gobolka Washington) (Ingiriisi) iyo agabyada la xiriira, iyo Promoting Healthy Outcomes for Pregnant Women and Infants bill (Horumarinta Natiijooyinka Caafimaadka leh ee sharciga Haweenka uurka leh iyo Dhallaanka) (Sharciga Beddelka ah ee Senetka 5835) waxa ku jira samaynta xeelado lagaga hortagayo xanuunka ka fogaanshaha dhallaanka iyo saamaynta kale ee si xun u isticmaalka opioid iyo habaynta daryeelka dhallaanka ku dhasha astaamaha ka bixitaanka. Kooxdan waxay sidoo kale soo saareen hagitaanka COVID-19 ee haweenka uurka leh iyo iyo dhallaanka ee umusha kadib.
- Qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadayada si aan u wanaajino caafimaadka ilmaha ayaa ah horumarinta qiimaha iyo helitaanka baarista korriinka, iyada oo dabagal hore iyo u gudbinta adeegyada waxqabadka ah loo sameeynayo marka loo baahdo. Waxaan ka shaqeyneynaa inaan yareyno caqabadaha ku wajahan booqashooyinka caafimaadka carruurta, kordhinta iyo dabagalka heerarka baaritaanka korriinka, kordhinta isku xirnaanta adeegyada, iyo kobcinta dhaqamada biilasha adeeg-bixiyeyaasha. Kadib markii aanu maalgelin ka helnay sharci-dejinta, waxaanu ka shaqaynaynaa inaanu abuurno nidaam cusub oo baaritaanka koriinka oo caalami ah. Nidaamkan ayaa noqon doona mid u furan adeeg-bixiyeyaasha iyo waalidiinta, si ay ula socdaan heerarka baaritaanka iyo si ay gacan uga gaystaan xaqiijinta in dhammaan carruurta gobolka ay helaan baaritaanka ku aadan dib u dhaca korriinka.
- Si kor loogu qaado caafimaadka dhalinyarada, DOH waxay la shaqaysaa school-based health centers (SBHCs, xarumaha caafimaadka ee dugsiga ku salaysan). Dhallinyarada, gaar ahaan kuwa qayb ka ah dadka leh natiijooyin kala duwan oo caafimaad iyo bulsho, waxaa laga yaabaa inay ku adkaato

helitaanka nidaamka daryeelka caafimaadka sababo badan awgood. Sababaha waxaa ka mid noqon kara gaadiid la'aan, go'doon bulsheed, xaalado nololeed oo adag, ama eex jinsiyadeed. Dhallinyaradan ayaa laga yaabaa inay goobaha dugsiga uga helaan daryeel caafimaad si aad ugu habboon, halkaasoo ay dhigtaan lagana yaabo inay ku raaxaystaan. Waxaa jira cadaymo xooggan oo sheegaya in helitaanka adeegyada SBHC iyo booqashooyinka caafimaad ee caadiga ah ee qaan-gaarnimada ay yareeyaan maqnaanshaha dugsiga, heerarka ka-bixista dugsiga, jirrooyinka daba-dheeraada, isticmaalka maandooriyaha, heerarka caabuqa galmada lagu kala qaado, iyo heerka uurka. Iyadoo la kordhinayo heerarka qalin-jabinta isla markaana la wanaajinayo maareynta cudurada sonkorowga, neefta, iyo jirrooyinka dhimirka.

- Xarumaha caafimaadka ee ku saleysan dugsiga waxay wajahayaan caqabado badan si ay u helaan lacag celin ku filan oo loogu talagalay adeegyada la bixiyo, taasoo saameynaysa sii jiritaankooda. Wax ka barashada khadka intii lagu jirey masiibada COVID-19 waxay caqabado dheeraad ah u abuurtay SBHCs. Waxaan la shaqeyneynaa SBHC-yada, Maamulka Daryeelka Caafimaadka, iyo kuwa kale si aan wax uga qabanno arrimaha biilasha iyo lacag celinta. Dhalinyaro badan oo reer Washington ah ayaa xaq u leh Medicaid laakiin aan weli la diiwaan gelin. Waxaan sameyneynaa xeelado lagu kordhinayo isdiiwaangelinta si aan gacan uga geysanno kordhinta tirada dhalinyarada ee hela adeegyada daryeelka caafimaadka.

  Waxaa mahadcelin mudan fulinta Substitute House Bill 1225 (Sharciga Bedelka Ah ee Aqalka 1225): ee 2021 Ku saabsan Concerning School Based Health Centers, (Xarumaha Caafimaadka ee Ku Salaysan Dugsiga), waxaanu bilaabaynaa shaqo cusub oo xiiso leh (Ingiriisi). Sharcigan ayaa faraya DOH inay dhisto xafiiska barnaamijka SBHC si loo kordhiyo loona joogteeyo helitaanka adeegyada ardayda iyadoo diirada la saarayo dadka taariikh ahaan aan loo adeegin. Waa tusaale kale oo muujinaya sida aan u isticmaalno maalgelinta aan ka helno ilo badan si aan wax uga qabano baahiyaha mudnaanta leh.

Waxaan wax ka bedel ku samaynay ahmiyadaheena iyo hawlaheena shaqada si aan wax uga qabanno masiibada COVID-19. Waxaan gacan ka geysanay in saadka iyo gargaarka kale la siiyo dadka u baahan in la karantiilo ama la go’odoomiyo. Waxaan gacan ka geysannay in tallaalka laga helo gobolka oo dhan. Waxaan sidoo kale taageernay ururinta iyo falanqaynta xogta si aan si wanaagsan u fahanno saamaynta fayraska iyo sida dadka looga ilaaliyo.

Kheyraadyo maalgelineed ee kala duwan ee gobolka iyo federaalka ayaa taageeraya barnaamijkayaga guud ee MCH. Waxaan lacagaha MCHBG u isticmaalnaa inaan ku bixino qaybo ka mid ah mushaharka maamulayaasha barnaamijka kuwaas oo qorsheeya oo kormeera shaqada istaraatiijiga ah si loo horumariyo nidaamyada caafimaadka dadweynaha. Waxay ka shaqeeyaan sidii ay u xaqiijin lahaayeen haweenka iyo carruurtu inay helaan gunnooyinka caafimaad ee ay xaqa u leeyihiin, oo ay ku jiraan adeegyada caafimaadka ka hortagga ah iyo baaritaanka. Waxay sidoo kale kor u qaadaan muhiimada daryeelka isku dubaridan ee guriga caafimaadka gudahiisa ah, waxayna wax ka qabtaan arrimaha ku filnaanta caymiska.

Maalgelintayada ku aadan kahortagga iyo badqabka hooyada, ilmaha, iyo dhalinyarada waxay sidoo kale gacan ka geystaan fulinta hadafka Governor’s Office of Equity (Xafiiska Sinaanta ee Guddoomiyaha Gobolka) ee ah "Qof walba oo Washington jooga wuxuu si buuxda u heli karaa fursado, awood, iyo agabyo ay u baahan yihiin si ay u koraan oo ay u gaaraan awooddooda buuxda waxaana jirta sinnaan iyo cadaalad ay u wada dhan yihiin dhammaan, toddobada qarni ee soo socda iyo kuwa ka sii dambeeyaba.

Washington State Department of Health